V2.0 Taariikhda: Luulyo 2026

# Su'aalaha mar walba la is waydiiyo

## Ka dalbo cunto aabka bukaan jiifka

### Waa maxay CBORD?

CBORD Patient waa magaca barnaamijka cuntada bukaanka ee loo isticmaalo in lagu dalbado cuntooyinka isbitaalka QEII.

### Yaa isticmaali kara CBORD Patient App?


Bukaannada ku sugan waaxyaha isbitaalka QEII waxay awoodi doonaan inay isticmaalaan CBORD Patient App si ay u dalbadaan cunto – marka ay rabaan, goor dambe sanadkan.

Qoyskaaga iyo/ama daryeelahaaga sidoo kale waxay kaa caawin karaan inay kuu dalbaan cuntooyinka – laga keenayo dibadda isbitaalka – iyagoo isticmaalaya barnaamijka bukaanka ee taleefankooda casriga ah ama qalabkooda.

### Maxay tahay sababta aad u isticmaalayso barnaamijkan?

- Waa sahlan tahay in la isticmaalo, talaabooyin iyo badhammo si fiican wax u sharaxaya ayuuna leeyahay.
- Waxaad si toos ah u dalban kartaa cunto adigoo saaran sariirtaada – looma baahno in waraaqo ay ku qoran yihiin liistada cuntada laguu keeno.
- Waxaad dooran kartaa cuntada ku habboon baahiyahaaga nafaqada.
- Waxaad dooran kartaa xilliyada cuntada ee kugu habboon.
- Waxaad arki kartaa sawirrada cuntada aad dalbaneyso.
- Meel la wacayo oo aad sugeyso majirto.
- Qoyskaaga iyo/ama daryeelahaaga ayaa kuu dalbi kara cunto ayaga oo ku sugan meel ka baxsan isbitaalka.

# Waxa aad u baahan tahay




1. Taleefankaaga ama qalabkaaga casriga ah.
2. Barnaamijka CBORD Patient oo aad soo dejisato si aad u sameysato akoon leh username iyo password.
3. Taariikhda dhalashada
4. Faahfaahinta isbitaalka ee lagula wadaagay markii aad isbitaalka soo gashay oo ay ku jiraan Aqoonsiga bukaanka (UR/MRN lambarka ku yaal waraaqda gacanta kuugu xiran)
5. Faahfaahinta ku saabsan meesha aad ku sugan tahay:
   - Aqoonsiga xarunta: Geli xarfaha **qeii**

Haddii aadan haysan telefoon aad adiga leedahay ama haddii ay jirto cunto khaas kuu ah, la hadal kalkaalisadaada si ay kaaga caawiso inaad hesho hab aad ku dalbato.

# Sida loo dalbado

**Qaabka koowaad – Isticmaal App-ka Bukaan-socodka CBORD**

- Tani waa habka ugu dhaqsaha badan ee aad ku dalban karto cuntadaada adigoo sariirtaada saaran.
- Daawo fiidiyowga App-ka Bukaan-socodka CBORD iyo/ama akhri hagaha tilmaamaha si aad wax badan u barato.

  Booqo metrosouth.health.qld.gov.au/patients-and-visitors/staying-in-hospital/order-meals-with-a-patient-app.
- Gal App-ka bukaan-socodka.

Waxaad heli kartaa app-ka adigoo:

- Sawiraya koodhka QR ee ku yaal menu-ga sariirtaada adigoo isticmaalaya telefoonkaaga ama qalabkaaga casriga ah, ama

  Soo dejinaya App-ka Bukaan-socodka CBORD ee App Store ama Google Play.

Markaad heshid app-ka, waxaa lagu weydiin doonaa:

- Inaad sameysato akoon aad u sameysatay username iyo password
- Bixi:
  - Aqoonsiga bukaanka (UR/MRN lambarka ku yaal waraaqda gacanta kuugu xiran)

  - Taariikhda dhalashada
  - Aqoonsiga xarunta: Geli xarfaha **qeii**
- Qoyska iyo/ama daryeelaha waa inay sameeyaan akoon iyagoo isticmaalaya iimaylkooda, ma isticmaali karaan email-ka bukaanka.

Ka dooro liiska cuntada cuntada aad adigu doonayso oo hubi inay xulashadaada sax tahay intaadan dalabka gudbin ka hor.

Haddii aadan haysan telefoon casri ah, isticmaal qaabka labaad ama qaabka saddexaad ee hoos ku qoran.

**Qaabka labaad – Wac Xarunta La waco**

Waxaad sidoo kale ka dalban kartaa telefoonka haddii aadan haysan qalab casri ah, aadan haysan moobilkaaga, ama aad doonayso inaad dalbato cunto dhaqankaaga iyo diintaada u gaar ah, ama aadan hubin qaar ka mid ah waxyaabaha ku jira menu-ga.

- Adoo isticmaalaya taleefankaaga gacanta: **(07) 3845 7770**
- Adoo isticmaalaya telefoonka isbitaalka: **ext. 7770**

Fadlan noo sheeg:

- Magaca bukaanka
- Aqoonsiga bukaanka (UR/MRN lambarka ku yaal waraaqda gacanta kuugu xiran)
- Taariikhda dhalashada
- Aqoonsiga xarunta: Geli xarfaha **qeii**

Waxaan taleefanka kaaga sheegi doonaa xulashooyinka menu-ga kabacdina waxaan kuu sameyn doonaa dalab.

**Qaabka saddexaad – Weydii kalkaaliso ama shaqaalaha nafaqada**

- Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u dalbato, la hadal kalkaalisadaada.
- Haddii aad doonayso cunto khaas ama aad leedahay xasaasiyad, shaqaalaha nafaqada ayaa kaa caawin kara inaad doorato cuntada saxda ah.

## Maka dalban karaa cunto khadka internet ka anigoo aan isticmaalin barnaamijka bukaanka?

Cuntooyinka sidoo kale waxaa laga dalban karaa online ka adigoo aan soo taleefankaaga kusoo dejisan barnaamijka CBORD Patient. Tag **patient.cbord.com** oo sameyso akoon leh username iyo password.

Geli faahfaahinta isbitaalka ee lagula wadaagay markii aad isbitaalka timid oo ay ku jiraan:

- Aqoonsiga bukaanka (UR/MRN lambarka ku yaal waraaqda gacanta kuugu xiran)
- Taariikhda dhalashada

Geli faahfaahinta ku saabsan goobta aad ku sugan tahay:

- Aqoonsiga xarunta: Geli xarfaha **qeii**

## Ma ka dalban karaa waxa aan rabo app-ka?

Waxaad app-ka ama Xarunta La Waco ka dalban kartaa oo keliya cunto iyo cabitaanka koodhkaaga cuntada.

Inta aad ku sugan tahay isbitaalka, waxaa lagu siin doonaa koodh cunto oo ku habboon baahiyahaaga caafimaad, cuntooyinka khaaska ah, baahiyaha dhaqanka ama diinta iyo/ama xasaasiyadaha. Kooxdaada caafimaadka ayaa sidoo kale laga yaabaa inay kuu qorsheeyaan cunto adiga khaas kuu ah.

Fadlan u sheeg kalkaalisadaada haddii laguu qoray cuntooyin khaas ah, baahiyo dhaqameed ama diimeed ama xasaasiyad.

Marka aad gasho app-ka, waxyaabaha kujira koodhka cuntadaada ayaa shaashadda ka soo bixi doona si aad u doorato. Qaar ka mid ah waxyaabaha ku jira menu-ga weyn (sida Sameyso Salad adiga kuu gaar ah iyo Sandwich-yada) iyo sidoo kale qaar ka mid ah koodhadhka xasaasiyadda iyo koodhadhka cuntada ayaanan laga dalban karin app-ka.

## Ma dalban karaa cunto marka aan rabo?

Adeega qofka loogu keenayo wixii uu dalbado qolka ayaa ah qiyaastii **45 daqiiqo** laga soo bilaabo markaad dalabka sameysay ilaa inta jiifka laguugu keenayo. Xilliyada hada cuntada la bixiyo, tusaale, Maalintii oo dhan waxaa la heli karaa quraac, qado/casho.

Haddii aad cunto dalbato xilli ka baxsan saacadaha hada loo qorsheeyay adeega cuntada, cuntadaada waxaa la diyaarin doonaa oo laguuna keeni doonaa marka la gaaro xilliyadaas cuntada loo qoondeeyay. Markaas ka dib ayaa cuntada waxaa la keeni doonaa sariirtada **45 daqiiqo** gudaheed.

Si aad horay ugu sii dalbato, adiga ama qof ka tirsan qoyskaaga ama qof ku daryeela ayaa geli kara barnaamijka (app-ka) bukaanka oo waxaad sii dalban kartaa cunto iyo cabitaan ilaa hal maalin ka hor.

## Cuntada iyo wixii xasaasiyad ah

Haddii aad leedahay xasaasiyad cunto, ama baahiyo dhaqameed ama diimeed, ama baahiyo cunto oo gaar ah, fadlan u sheeg kalkaaliso si markaas cunto kugu habboon laguu siiyo. App-ka bukaanka ayaa muujin doona xulashooyin cunto oo aysan wax dhibaato ah kaaga imaanayn oo loogu talagalay xasaasiyadaha caadiga ah iyo qaar ka mid ah cuntooyinka gaarka ah. Haddii aadan hubin waxyaabaha menu-ga ku qoran, fadlan wac Xarunta La Wacdo.

## Macluumaadkayga shaqsi ahaaneed inaan la wadaago CBORD ma mid ammaan ah baa?

Macluumaadkaaga gaarka ah ee aad la wadaageyso CBORD Patient App, waxaa loo isticmaalaa kaliya si lagaaga caawiyo dalbashada cuntada, sida ku xusan Xeerka Baraayfasiga (privacy) Macluumaadka 2009 (Qld) (Xeerka IP).